

## Waxbarasho Wadajir ah Tallaabo kasta oo la qaado

MAGAALADA TORONTO | KOOXDA ADEEGGA CARRUUNIMADA HORE: COMMUNITY LIVING TORONTO | XARUNTA MEESHA SURREY (SURREY PLACE CENTRE)

### **XAANSHI-TILMAAN-BIXINEED**

## **Hannaanka Kala Horreysiinta Xirashada Xarkaha Kabaha**

Carruur fara badan ayaa u baahan taageero markay baranayaan xirfad cusub. In loo kala qaado xirfad tallaabooyin aad u yarna waxay ilmaha ka cawin kartaa inuu barto halkii marba hal tallaabo. Tiro ahaan inta tallaabo oo xirfad ama hawl loo kala qaadayana waxay ku xiran tahay baahida ilmahaaga. Waxaa suurtagal ah inaad siiso ilmahaaga nidaam muuqaal ah oo kala horreeya. Taasina asal ahaan waxa weeye sawirro taxane ah o ku tusinaya tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in la dhammaystiro hawl. Waxaanad isticmaali kartaa sawirro dhab ah, sawirro xarriijin ah, ama sataamo sawirro ah. Markaa aad isticmaalayso nidaam muuqaal ah oo kala horreeya, ku dheji meel la siman aragtida ilmahaaga, fartana ku fiiq sawirka, oo akhri tallaabada ka hor inaad dhammaystirin hawsha adigoo adeegsanaya cod aad u sarreeya.

Waxaa kale oo aad isticmaali kartaa sawirrada si aad u samaysato ciyaar adiga kuu gooni ah oo leh nidaam kala horreeya. Sil hawl yari ah u daabaco sawirrada, kana jar meeshay ku yaallaan, ilmahaaguna haku tababbarto asgoo tallaabooyinku siday isugu xigaan u kala hormarinaya. Waxaa kale oo aad samayn kartaa ciyaar wa la is-waafaqsiyo adigoo labo nuqul (koobi) ka samaynaya hannaanka ay wax isugu xigaan. Si isku mid ahna ugu dheji hal nuqul xaanshida dhismaha (construction paper) nuqulka

kalena ha isticmaalo ilmahaagu si uu isu waafaqsiyo isulana doonto kaararka isku midka ah.

### ***Halkan waxa ah tusaale muujinaya hannaanka ay u kala horreeyaan 'xirashada xarkaha kabaha':***

1. Far iyo suul ku soo qabo xarkaha.
2. Soo dhifo xarkaha.
3. Sur dhammayyada xarkaha dhinacyada ku soo aaddan ee kabaha.
4. Gacanta sare ugu soo qaad xarkaha kabaha.
5. Xarkaha dhusha ka soo mari kabaha.
6. Xarigga midig dul mari kan bidix si aad u samaysato xagal.
7. Xarigga bidix ku soo aaddi dhinacaaga.
8. Xarigga bidix ka soo dhex-bixi xagasha.
9. U kala jiid xarkaha labada dhinac.
10. Qallooci xarigga bidix si ay samaynsanto qoollaab.
11. Gacanta bidix ku soo qabo qoollaabta.
12. Xarigga midig soo dul-mari faraha kana soo dul-wareeji qoollaabta.
13. Ka soo dusi xarigga midig daloolka.
14. Qoollaabaha u kala jiid labada dhinac.